MYNDIGHETEN FÖR TILLGÄNGLIGA MEDIER

# Ku soo dhawow Legimus iyo aduunka buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban!

Ilmaha aad adigu waalidka u tahay wuxuu haystaa fursada ah in la helo buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban iyadoo loo marayo xisaabta isticmaalka ee shaksiga ah gudaha Legimus.

### Waa maxay buug la dhegaysto oo cajalad ku duuban?

Buug la dhegaysto oo cajalad ku duuban waa in laguu akhriyo buug hore u jiray isagoo ah buug daabacan. MTM waxay samaysaa buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban iyadoo ay taageerto sharciga xuquuqda asalnimada. Kuwan waxaa si gaar ah loogu akhriyaa dadka iyadoo ay sabab u tahay hoos u dhac awooda ah, xanuun ama dhaawac darteed ay ku adagtahay inay akhriyaan qoraalka daabacan.

### Waa maxay Legimus?

Legimus waa maktabad dijitaal ah taas oo Hey'adda dawladeed ee warbaahinta la heli karo, MTM, ay mas'uul ka tahay. Iyadoo la adeegsanayo xisaabtan wuxuu ilmuhu amaahan karaa buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban. Ilmuhu wuxuu Legimus ku isticmaali karaa iskolka iyo xilliga firaaqaha labadaba.

### Maxaa ku jira Legimus?

Legimus waxaa ku jira in ka badan 115 000 buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban, sheekooyin iyo buugta xaqiiqda ku saabsan labadaba. Waxaa kaloo jira buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban oo ah luqado kale. Qaar ka mid ah buugta la dhegaysto ee cajaladda ku duuban waxay akhriyaan oo keliya qoraalka laakiin gudaha qaar baan oo buugta la dhegaysto waxaa ku jira xitaa qoraal iyo sawiro. Dhinaca legimus.se/barn waxaa laga helayaa talooyinka buugta iyo maqaalo ku saabsan arrimo xiiso leh. Ilmaha laf ahaantiisu wuxuu dadka kale kula talin karaa buugaag.

### Sidan ayaa ilmuhu u akhrin karaa buugaagta la dhegaysto

Ilmuhu wuxuu buugta la dhegaysto u akhrin karaa dhowr qaab oo kala duwan: gudaha telafoonka moobilka, kombiyuutarada shaashadaha yar ama kombiyuutar leh ab-ka legimus ama bogga interetka ee Legimus.

### Taageero

Xisaabta gudaha Legimus waxaa maamula maktabada shacabka ama iskoolka. Ilmuhu wuxuu la xiriiri karaa maktabadiisa dhinaca caawimaada xisaabta legimus.

## Heshiiska isticmaalka ee Legimus

• Buugtani waxay ku dhawrsanyihiin sharciga xuquuqda asalnimada oo waxa keliya isticmaali kara dadka iyadoo ay sabab u tahay hoos u dhax laxaadka ah ay ku adagtahay inay akhriyaan qoraalka daabacan.

• Markaad soo dejisato buuga la dhagaysto ama aad dhigato khaanada buugaagta waxay taasi xisaabsantahay amaah. Wakhtiga amaahda waa 6 bilood. Qofku wuxuu dib u soo celinayaa buuga iyadoo loo marayo in la masaxo.
• Macluumaadka lagu gelayo iyo buugtan waxaa loogu talogalay ilmaha isticmaalkiisa gaar ahaaneed oo ma la oggola in loo dhiibo dad kale.

### Maxaa dhacaya haddii ilmuhu jebiyo heshiiskan?

• Haddii ilmuhu jebiyo heshiiskan waxaa isaga/iyadu waayayaan xaqa in la isticmaalo adeegan.
• Faafinta sharci darada ah ee buugta la dhegaysto waa dembi ka soo horjeeda sharciga xuquuqda asalnimada oo waxay keeni kartaa dacwad ku soo oogid. Marka buugta la dhegaysto la soo dejisto waxay ku calaamadsamaan macluumaadka ku saabsan qofka amaahday buugan la dhegaysto. Markay dhacdo faafin sharci daro ah waxay MTM raad raac ku heli karaan qofka amaahday buugan la dhegaysto.

## Ilaalinta macluumaadka

MTM waxay kaydisaa oo isticmaashaa ilmahaaga iyo caruurtaada macluumaadkooda shakhsiga ah si waafaqsan sharciga ilaalinta macluumaadka (GDPR, 2016/679/EU). Magaca, cinwaanka e-mail-ka iyo tobanka lambar ama taariikhda dhalashada iyo lambarka kaarka LMA waxaa lagu diiwaan geliyaa gudaha MTM diiwaankeeda isticmaalayaasha. Taas mid la mid ah ayaa khuseysa magaca iyo taariikhda dhalashada ee ilmaha waalidkooda. Magaca, cinwaanka e-mail-ka iyo tobanka lambar ama taariikhda dhalashada iyo lambarka kaarka LMA waa inay mar kastaba ku jiraan diiwaanka isticmaalayaasha. MTM ma bixin karto xisaab haddii adigu aad ka soo horjeedo diiwaan gelin noocan ah. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali karaa si loo fuliyo baaritaanada tirakoobka iyo qiimeynta adeegyadayada. Adigu waxaad mar kastaba xaq u leedahay inaad diido in lagula soo xiriiro xilliga baaritaanadan. Tani waxaa loo maraa dhinaca ”Mina sidor” oo laga helo legimus.se ama iyadoo lala xiriiro maktabadaada.

Dadka macluumaadkooda shakhsiga ahi qarsoodiga yahay waxay codsan karaan in lagu maareeyo gudaha qayb qarsoodi ah oo ka tirsan diiwaankan. Halkaasi waxaa lagu diiwaan-geliyaa oo keliya tobanka lambar iyo cinwaanka e-mail-ka ama taariikhda dhalashada, lambarka ilmahaaga kaarkooda LMA-ga iyo cinwaanka e-mail-ka, isla markaana magaca iyo taariikhda dhalashada ee waalidka. Waa keliya tiro dad ah oo xadidan oo jooga MTM kuwa arki kara macluumaadkan.

Akrhi dheeraad ku saabsan sidaanu u maarayno macluumaadka shakhsiga ah dhinaca siyaasadayada badbaadada. Tani waxaad adigu ka helaysaa www.mtm.se/hantering-av-personuppgifter/

MTM waxay xaq u leedahay in dhinaca sabab la qeexay ay baddasho qawaaniinta isticmaalka. Ka waalid ahaan ilmo isticmaala Legimus waxaa waajib kaa saaranyahay in aad iskaa ugu dadaasho inaad ka warhayso isbaddelada iyo iyadoo bilaa daahid ah haddii aad ka soo horjeedo isbaddeladan aad wargeliso MTM adeegeeda jawaabaha. Haddii aad ka soo horjeedo isbaddelkan tani waxay tahay in helitaanka Legimus ku joogsan karo dhinaca MTM dalabkeeda.

Heshiiskan waxaa dib loo cusboonaysiiyay 2018-05-22 oo wuu shaqaynayaa si joogto ah.

## Waalidka oggolaanshahooda

Foomkan waxaa adigaaga ah waalidka aad ku bixinaysaa oggolaanshahaaga in ilmaha isticmaale ahaan laga diiwaan geliyo Legimus.

### Macluumaadka ilmaha

Magaca hore

____________________________________________________________

Magaca dambe

____________________________________________________________

Cinwaanka e-mail-ka ee la isticmaalayo magac isticmaale ahaan ee dhinaca Legimus iyo si loo soo diro macluumaadka gelitaanka iyo warbixinaha. Iska ilaali cinwaan e-mail ku xiran ilmaha iskoolkiisa maadaama kaasi joogsado marka ilmuhu joojiyo iskoolkan.

____________________________________________________________

Tobanka lambar ama lambarka isku duba-ridka

____________________________________________________________

*Haddi ilmuhu magan-gelyo ka raadsanayo Iswiidhan:*
Taariikhda dhalashada

____________________________________________________________

LMA-lambarka (XX-XXXXX)

____________________________________________________________

LMA-kaarka ilaa taariikhda uu ansaxa yahay

__________________________________________________________________

### Waalidka macluumaadkooda

Taariikhda dhalashada

____________________________________________________________

Magaca hore

____________________________________________________________

Magaca dambe

__________________________________________________________________

### Heshiiska isticmaalka iyo ilaalinta macluumaadka

( ) Aniga, waalidka ah, waan akhriyay oo oggolahay heshiiska isticmaalka ee Legimus.
( ) Aniga, waalidka ah, waan oggolahay in MTM ururiso oo maarayso ilmahayga iyo caruurtayda macluumaadkooda shakhsiga ah si ah qaabka ku magacaaban sharaxaada ilaalinta macluumadka ee loogu talogalay MTM diiwaankeeda isticmaalka. Maaraynta iyo macluumaadka shakhsiga micnaheedu waa inay ka mid tahay xiriirka macmiilka iyo adeegyadan.

Goobta iyo taariikhda

____________________________________________________________

Waalidka saxeexooda

________________________________________________________